# ISMAACIIL WIXII KUU QALMA 09-01-2004

Xaqiiqada mar baa loo qiraa Qawlku suu yahaye
Markuu Khaladka keennaa dayoo Qaarna naga dhaafo
Wuxuu Qaaddirkeen noo qoraan Qolona diidayne

Ismaaciil wixii kuu qalmaa lugu qaboobaaye
Qiirada Walaalnimo markaad Qaran inoo taagtay
Naftaadana qisaastiyo wixii Qarashya kuu yaalley
Qaaradaa darteen kuu niciyo Qoom kaloo negiye
inkastood Wanaag qabatay ood Khayrna nala doontay
Qabqabliyo midaan qaab lahayn Qoolna loo geliyey
Qurun iyo Qabiil baa Middaa naga khasaarsheene
Anaa huba Qur'aankiyo inaad Qiilna garaneehe
Qaydkii Caddaa Khoofka iyo Iilka Qiradiisa
Qiyaamaha markii loo qumee Quusta lagu baano
Xaajada qaraaraatay ee Qaanso Boqonkeeda
Qofkii falay Wanaag lama quboo Qaybti wuu heliye
Qalbigaaga geli Khayr ayaa Qoran oo kuu yaale.
-----------------------------------0-----------------------------------